



Isticmaalida Naloxone Inta lagu jiro COVID-19: Hagida loogu tallogalay Fullinta Sharciga, Jawaabayaasha Koowaad iyo Bulshada

La cusbooneysiyyay Agoosto 13, 2020

- Naloxone waa daawo loo isticmaalo in lagu soo celiyo saameynada neefsashada ee iska badinta daawada maandooriyaha. Jawaabayaasha koowaad, saraakiisha fullinta sharciga iyo dadka kale waxay keydiyeen kumanaan nolol iyaga oo la qaadanayo naloxone.
- Waad ka walaaci kartaa in qofka si xad dhaaf ah u qaadanayo wuxuu qabi karaa COVID-19. Si kastaba, naloxone waxay badbaadin kartaa nololsha qof oo si xad dhaaf ah u isticmaalayo, marka waa in la qaataa.

Maamulka Caafimaadka Oregon (Oregon Health Authority, OHA) wuu aqoonsanyahay walaacyada ku saabsan gaarista COVID-19. Tallooyinka si badbaado ah loogu qaadanayo naloxone waxaa ku jiro:

- **Qaadashada naloxone:** Si badbaado ah ayaad u isticmaali kartaa naloxone haddii aad ka figaatid gaaris aan muhiim aheyn. Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurka wuxuu ku qeexaa gaarista sida ku isticmaalida 15 daqiiqo gudaha 6 fiit ee qof. Isticmaalida naloxone waxay qaadataa ilbiriqsiyo.
- **Intranasal naloxone:** Intranasal naloxone waxaa laga qaataa sanko. Si ay kaa caawiso yareynta halista gudbinta COVID-19, haddii aad u isticmaashid intranasal naloxone looga shakiyay inuu iska badiyay daawada maandooriyaha waa inaad isticmaashaa:
 - Gacmo gashiyada, iyo
 - Illaalada wajiga (sida maaskaraha qaliinka).
- **Intramuscular naloxone:** Intramuscular naloxone waxay soo rogtaa halis hooseyso oo gaarista COVID-19 badelkii qaabka intranasal. Intramuscular naloxone waxay ku timaadaa labo noocyo:
 - Fudud in la isticmaalo mid la duri karo, ama
 - Duraha tooska ah ee dadajiso tilmaamaha hadalka.

Waa inaad isku durtaa muruqa naloxone ee muruqa bowdada. Bowdada way ka fogtahay sanko iyo afka, marka halistaada ee gaarista COVID-19 way ka hooseysaa intranasal naloxone ee walba. OHA waxay ku talineysaa isticmaalida gacmo gashi inta lagu jiro durida.

Intramuscular naloxone waxay bilaabataa saameynteeda labo illaa iyo shan daqiiqo durida kadib. Waxaad u baahan kartaa inaad ku celisid garoojada haddii qofka uusan ka jawaabin kadib dhoor daqiiqo.

Tixgelinada kale

- OHA waxay ku dhiirogelisaa isticmaalida qalabka illaalada shaqsiga (PPE) oo dhammaan taabashooyinka qof-ku-qof. Si kastaba, iska badinta daawada maandooriyaha oo aan la daaweyn inta badan waxay sababtaa dhimasho. Haddii aad tahay qofka ugu horeeyo ee ka jawaabayo goobta, waxaa inta badan leenka ugu dambeeyo ee difaacida ku aadan natijada dhimashada.
- Badbaadida neefsiga si sareyso ayaa loogu dhiirogelinayaa haddii qofka la badbaadiyay uu yahay xubinta guriga ama qoyska dhow.
- Badbaadiyaha ama goob joogayaasha kale waa inay soo wacaan 911 islamarkiiba. Daryeelka caafimaadka degdega ah waa muhiim sababtoo ah bulshada guud ma yeelan karaan naloxone ku fillan oo lagu go'aansanayo qaadashada garoojo kala duwan, ama iska badinta waxay ku lug yeelan kartaa daawooyin aan ka aheyn daawooyinka maandooriyaha.
- Markii qof dib uga soo noolaado iska badinta, badbaadiye ayaa ka dhaqaaqayo qofka si looga fogaado caabuqa imaan karo oo qufaca lama filaanka ah ama hadalka, taas oo caadi ka ah badbaadinta iska badinta.
- OHA way aqoonsantahay in dhammaan badeecooyinka naloxone aan laga heli karin meelaha qaar. Illo deegaanka ah ee wanaagsan oo laga baranayo halka naloxone laga heli karo waxaa ku jiro:
 - Waaxyada caafimaadka gobolka,
 - Goobaha yareynta waxyeelada (sida isdhaafsiyada cirbada), iyo
 - Hay'adaha adeega bulshada kale.

Naloxone waxaa sidoo kale laga helaa miisaska farmashiga oo gobolka oo dhan ah iyada oo aan loo qorin qoraalka.

- Waxaan ku dhiirogelineynaa isticmaalida PPE iyada oo aan laga eegin qaabka naloxone loo isticmaalo. Si kastaba, haddii aad tahay xubinta qoyska ama aad ugu dhowdahay qof iska badiyay, looma baahno inaad isticmaashid PPE; uma dhowid inaad kordhineysid halistaada COVID-19 markii aad qaadaneysid naloxone.
- Cudurka safmarka COVID-19 wuxuu keenaa tixgelino caafimaadka oo muhiim ah, laakin dadka qabo cudurka isticmaalka maandooriyaha weli wuxuu u baahanyahay caawin. Cudurka isticmaalka maandooriyaha iyo iska badinta daawada waxay noqon kartaa dillaa haddii aan la sheegin.
- Hadafka OHA waa kugu caawintaada go'aansashada sida si badbaado ah loo dhaxgalo iska badinta daawada maandooriyaha. Cudurka isticmaalka maandooriyaha wuxuu saameeyaa dad badan oo reer Oregon ah. Waa inaan sii wadnaa inaan qaadano naloxone sida baahida u timaado iyada oo aan yareyneyno halista gudbinta COVID-19.

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan ka hortaga iska badinta, fadlan fiiri [bogga Iska badinta iyo Si xun u isticmaalka Daawada maandooriyaha OHA](#).

Helitaanka Dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriisi, OHA waxay ku siin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsosha.state.or.us.